# Adeegga Deg-degga Saacadaha Uu Takhtarkaaga Xiran Yahay

## Su'aalaha badanaa la is-weydiiyo

### Waa maxay adeegga saacadaha uu takhtarka xiran yahay?

Adeegga Saacadaha uu Takhtarka Xiran Yahay ee BrisDoc waxaa la helaa waqtiyada uu rugta takhtarkaaga (GPgaaga) xiran yahay, saacadaha u dhexeeyo 18:30 habeenimo ilaa 08:00 subaxnimo maalmaha shaqada usbuuca, iyo 24 saac wikeendiga iyo maalmaha fasaxa.

Adeegga waa mid Deg-deg ah, waxaana loogu talagalay uun bukaanada u baahan adeeg deg-deg ah ama talo iyo kuwa aan sugi karin ilaa waqtiga la furo rugtooda GP subaxa ama wikeendiga.

Waxaan rugteena caafimaad la qaybsannaa adeegyada caafimaad kale ee subaxa, mar marna waxaa suurtogal ah in qolka sugitaanka lala qaybsado bukaano isticmaalo adeegyo kale.

### Sidee uu heli karaa adeegga?

Adeeggeena ma ahan mid ballan la'aan lagu baxsho – Waa inaad marka hore soo wacdo 111 si aad adeegga u hesho.

NHS111 waxay awoodaan inay baxshaan turjubaano ku caawin karo haddii Ingiriisku uusan eheen luqaddaada hooyo. Waa bilaash markii laga soo waco telefoonada oo dhan iyo mobaylka.

Shaqaalaha NHS111 ee telefoonka ka qaban doono waxay ku weydiin doonaan faah-faahin kugu saabsan iyo waxay kuu gudbin doonaan adeegga u habboon baahidaada. Haddii aad u baahan tahay adeegga takhtarka, waxay kuu qaban-qaabin karaan in takhtarka dib kuu soo waco ama ballan ayey kaaga samayn karaan hal ka mid ah xafiisyadeena. Waxay xittaa kuu gudbin karaan adeegyo kale sida qaybta dhaawacyada fudud (MIU) ama Qaybta Deg-degga ee Isbitaalka (A&E).

**Haddii xaaladdaada yahay mid deg-deg ah iyo halis gelin karo noloshaada, mar walba wac 999.**

### Waxaan u baahanahay turjubaan – miyaa la ii qaban-qaabin karaa?

Waxaan qabnaa adeeg telefoon ee turjumi karaa ilaa 200 luqadood. Fadlan eeg warbixinta ku qoran miiska soo dhaweynta, iyo shaqaalaha soo dhaweynta u sheeg haddii aad adeeggaan u baahan tahay.

Turjubaanada dhegoolaha ayaa xittaa la heli karaa, laakiin kani waa in hore loo codsado, waxaana u baahan karnaa inaan dib u qaban-qaabinno ballankaaga si uu turjubaankaas kuu

caawiyo, gaar ahaan haddii aadan hore inoo sheegin inaad caawinaad sidaas oo kale u baahan tahay.

## Yaan arki doonaa waqtiga ballanka?

Kooxdeena caafimaad wuxuu ka kooban yahay takhaatiir, kaaliyayaal Caafimaad takhasuusan iyo khabiirada daryeelka deg-degga, dhammantoodana waxay xirfad iyo waayo aragnimo ku qabaan adeegga ay baxshaan, iyo waxay awoodi doonaan inay daawo kuu qooraan haddii aad lagama-marmaan yahay.

Xafiisyadeena ugu mashquulsan waxaa suurtogal ah in markii hore ku arko kaaliyaha Daryeelka Caafimaadka si ay u baaraan cadaadiska dhiiggaaga iyo her kulkaaga, iyo shaqaalaha caafimaadka ku caawiyaan qiimeeynta mudnaanshada la siin doono ballankaaga.

## Muddo intee le eg ayaan sugi doonaa?

Saacadda ballankaaga waa laguu sheegi doonaa, laakiin waxaa muhiim ah in la xasuusto in kani yahay mid beddelmi kara. Waxaan nahay adeeg caafimaad deg-deg ah, sidaa awgeeda shaqaalaheena caafimaad waxay bukaanada u arki doonaan sida uu xaaladdooda khatar u yahay ama mudnaansho u leeyahay ee MA AHAN waqtiga ay yimaadeen rugta caafimaad. Waxay xittaa telefoon u diri doonaan bukaano isla waqtiyada ay bukaano kale fool ka fool arkaayaan, waxaana laga yaabaa inay daahaan sababtoo ah bukaan kale ayaa u baahan karo ambalaanso ama in isbitaalka la seexiyo.

Waxaan ku talajirnaa inaan 80% ee dhammaan bukaanada aragno 30 daqiiqo gudaheeda saacadda ballanka loo sameeyey, laakiin waqtiyada aan aad u mashquulsanahay, waxaa suurtogal ah inaad sugto waqti ka dheer wixii aad filaysey. Shaqaalaha soo dhaweynta ayaa kuu sheegi doono haddii waqti dheer sugi doontid – fadlan asaga ama ayada u sheeg haddii xaaladdaada sii xumaado intii aad ballankaaga sugeysid.

## Waxaan rabaa inaan jawaab-celin ka baxsho adeegga aan heley.

Inkastoo aan jecelnahay adeegga aan bixinno, waan ognahay in mar mar ay dhibaato jiraan. Jawaab-celintaada – ha ahaado mid fiican ama xun – wuxuu nagu caawin doonaa inaan sameyno is-beddelada si loo sii wanaajiyo adegga aan siinno bukaanadeena.

Haddii aad dhibaato qabtid, marka kowaad, u sheeg shaqaalaha soo dhaweynta, oo laga yaabaa inay xallin karaan dhibaatada. Waxaan rabnaa inaan ku siinno adeegga ugu heer sare iyo waxaan rajeynaynaa in shaqaaleheena ku caawiyo sida ay awoodaan. Haddii shaqaaleheena kilinikada aysan xallin karin dhibaato markaa waxaad la xiriiri kartaa Kooxdeena Xafiiska Dhexe:

- **hab boosto Patient Feedback, 21, Osprey Court,  Bristol BS14 0BB**
- **hab email enquires@brisdoc.org**

Dhammaan cabashoyinka waa la baari doonaa iyo waa laga jawaabi doonaa.

Waxaad xittaa isticmaali kartaa hal ka mid ah foomkeena jawaab-celinta ee laga helo miiska

kilinkada si aad nagu ogeysiiso ra'yigaaga ku saabsana adeggeena.

## Waxaan rabnaa inaan bukaanada ku dhirrigelino in jawaab-celin fiican ka sameeyaan adeegyadeena iyo shaqaalaheena.

Shaqaaleheena caafimaad si aad u adag ayey u shaqeeyaan, 365 maalmood sanadkiiba, waqti walba, 24 saac maalintii uu adeegga furan yahay wikeendiga iyo maalmaha fasaxa iyo habeenka oo dhan maalmaha shaqada ee usbuuca. Haddii xubin ka mid ah shaqaaleheena aad kugu dadaalo, ama aad u maleysid inay adeeg aad u fiican kuu qabteen ayagoo raacaayo "**adeeg Bukaan fiican oo baxshey Shaqaale fiican**", markaa fadlan soo buuxi foomkeena jawaab-celinta iyo waxaan isku dayi doonnaa inaan qoftaas u sheegno fallooyinkaaga.